



Waxa Aanu Maqalnay

Barnaamijka Buundada Gableedka Seattle:
La Xiriirka Bulshada iyo Ganacsatada oo Kooban

Guga/Xagaaga 2021



Seattle
Department of
Transportation

Sida aan u Wajaheyno

Buundada Sare-Kacsan ee Galbeedka Seattle waa buundada loogu isticmaal badan yahay Magaalada, caadiyan xambaari kara qiyaas 84,000 gawaari iyo 19,000 oo dadka raaca gaadiidka dadweynaha maalintiiba iyadoo ah isku xiraha muhiim ah ka gudba Webiga Duwamish. Xiritaanka buundada waxey sababtay joogsi ku yimaada socodka baabuurta iyo koror baahida bulshada aaggaasi deggan.

Intii u dhaxeysay Febraayo iyo Abriil 2021, Waaxda Gaadiidka Seattle, Waaxda Xaafadaha, ECOSS, iyo Vida Agency waxey sameeyey 10 kooxood diiradda iyo in ka badan 60 wada hadal qof iyo qof ah lala wadaagayo Galbeedka Seattle, Dooxada Duwamish, iyo dadka iyo ganacsatada Georgetown ee ay saameysay xiritaanka xiritaanka Buundada Sare Kacsan ee Galbeedka Seattle. Waxan si gaar ah u raadinay inaan ka dhageysano ganacsatada iyo xubnaha bulshada ee dhaqan ahaan aan loo adeegi jirin iyo sidoo kale shaqaalaha lagama maarmaanka ah ee helaya daaweyn naf lagu badbaadinayo.

Wada haddalladaasi oo hoos intooda ugu muhiimsan lagu soo ururiyey, iyo qorshayaasha tallaabooyinkeena xiga.

Tilmaannada Jidadka lagu helo

Si u dhex qaaddo qoraalkan, raadi sawirradani:



Waxyaabaha ugu muhiimsan



Tallaabooyinka xiga

Riix halka hoose si aad ugu aqriso warbixintaan luqadaha soo socda:

[Shiinees](#)

[Khamer](#)

[Kuuriyaan](#)

[Oromo](#)

[Isbaanish](#)

[Soomaali](#)

[Fiyetnaamiis](#)

Ganacsiyada lala Xiriiray:

- Miliilayaasha ganacsatada yar-yar
- Ganacsi uu leeyahay ama uu ka shaqeeyo qof madow, asali ah, ama midab leh
- Darawaliinta gawaarida gacanta loo haadiyo
- Maqaayadaha
- Kuwa Dhirta ka shaqeeya
- Tuuboleyda
- Xarumaha nolosha lagu caawiyo
- Nadiifiyaasha dhismayaasha
- Aqallada ciddiyaha iyo timaha lagu hagaajiyo
- Shaqaalaha saldhiggoodu yahay Harbor Island
- Helitaanka cunto iyo bixiyeyaasha adeegyada bulshada

Luqadaha Dadka lagula Xiriiray waxay ahaayeen:

Shiinees (Lahjadda Kantoniis iyo Mandarin)

Kuuriyaan

Oromo

Isbaanish

Soomaali

Fiyetnaamiis

Waxanu aannu Maqalnay



1. Xubnaha bulshada waxey leeyihiin Galbeedka Seattle waxa laga dareemayaa iney jasiirad la mid tahay

Dad badan oo deggan waxey nala wadaageen in ay dareemayaan go'doon iyo iney ka go'een qoysaskoodii, bulshada, iyo qeybo kale oo ka mida magaalada sabab la xiriirta daahidda dheer ee socodka baabuurta iyo safarrada dhaadheer ee waddooyinka laguna daray cudurka baahsan ee COVID-19. Waxey tilmaameen saameynta ay dadka ku yeelatay xiritaanka buundada Galbeedka Seattle:

- Kororka socodka baabuurta, waditaanka dareen la'aanta, saameynta bey'adda ama cimilada iyo caafimaad ee xaafadaha ku teedsan waddooyinka lagu leexo.
- Darbiga ku gudban aaditaanka shaqo, adeegyo, ballamada dhaqaatiirta, iyo filashada daryeelka caruurta ama waqtiga; kororka qarashka gaaska iyo cimri deg-degga ku yimaada baabuurta.
- Saameynta xun ay ku leedahay shaqooyinka oo tegitaankooda laga daaho, gaar ahaan waalidiinta oo sidoo kale u baahan kara iney caruurta dartood uga tagaan shaqada waqtiga ka hor si ay u tagaan xarumaha caruurta inta aan la xirin.
- Waqti badan oo ku baxa jidka wuxuu la macno yahay waqti yar oo reerku isu helaan, hagaajinta aqalka, hurdada, iyo dareemid wanaagsan.
- Qaar waxey sugaan wax badan iney helaan daryeel caafimaad fogaanta darteed iyo qarashka lagu tagayo dhakhaatiirta dhaafsiisan Webiga Duwamish.

"Darawalladu waxey nodeen kuwo xad-gudub sameeya, ma ixtiraamaan kuwa baaskiillada wata, ama dadka lugeynaya. Nasiib darro, waxan arkay hooyooyin kala gudbaya waddada cauur iyo darawallada oo aad u handadaya...Waxey runtii iigu muuqataa qatar."

Ka Qeyb-qaate Kooxda Diiradda oo Isbaanish ah

"Dad badan waxey ka meer-eerayaan iney yimaadaan Galbeedka Seattle. Culeyska ay leedahay inaad faamil aragto, xiriirka aad sii waddo, innaga ayey in saaran tahay. Waxa ay si xooggan u saameysay awoodda aad ku arki karto xubnaha faamilka waxeyna caqabad ku noqotay xiriiradaasi."


-Qof Delridge Deggan



Maxeynu ka qabaneynaa

- Innagoo deg-deg uga shaqeyneyna si buundada sare loo hagaajiyo si loo soo celiyo socodkii baabuurta bartamaha 2022.
- Innagoo ka haldleyna dareenka laga qabo amniga dadka lugeynaya iyo baaskiillada ku dhex wata barnaamijka Home Zone iyo isu dheelli-tirnaan waddo dhinaceedyada.
- Curinta barnaamijyo iyo ilo si loo caawiyo dadku iney uga gudbaan Webiga Duwamish siyaabo kala duwan.
- Qiimeyn saxiix ah ayaa loo baahan yahay iyo farqi ku wajahan waddooyinka leexadka iyo feeriga.
- Waxa la bilaabay ololaha Beddel Socdaalladaada Galbeedka Seattle si loo dhiirri-geliyo isticmaalka basaska.

Sidee Bay Ganacsigaagu Saameyn ugu Yeelatay?



Muuqaalka 1: Jawaabaha Tayeysan xilliga wareysiyada qof-ka-qofka ah.

2. Warbixinta ku saabsan lumidda macaamiisha iyo kororka qarashka howlaha ganacsiga

Ganacsiyadu waxey ka warbixiyeen saameyn xun ku timid dakhliga iyo helitaanka macaamiil, xigashada xaalado is-dul saaran oo ka dhashay xiritaanka buundada, dhismayaasha ka socda agagaarka waddooyinka leexadyada, iyo weerarkii cudurka baahsan oo isku waqti ah.

- Soo qaadidda alaabaha ayaa tan ugu weyn ee wadidda looga gudbayao Webiga Duwamish, ganacsiyo bandanna waxey tilmaameen inaaney awoodin iney ka soo iibsadaan waxa ay rabaan dukaamada Galbeedka Seattle.
- Maqaayado badan, helid la'aanta maridda Buundada Hoose iyadoo soo qaada alaabo hallaabi kara waxey noqotay qarash siyaado ah iyo goob istarees ka yimaado, gaar ahaan alaabaha saaran baabuurta aan gabooyiye laheyn si loo xafido alaabaha hallaabi kara waqtiga socodka dheer ay ku gudo jiraan.

“waxan jira ganacsato alaabta aan ka soo qaato [oo diiday] iney yimaadaan oo alaabta noogu keenaan Galbeedka Seattle.”

- West Seattle Deli Mart/Dukaanle Milkiile

“waxa run ahaantii dakhli inooga lumay xiritaanka buundada iyo macaamiil aad u fara oo ka iman jiray Sodo, ama Georgetown oon mar dambe iman karin. Waxa nooga lumay qiyaas 30-40 boqolkii macaamiisheenii cudurka baahan ee karoona iyo weliba ka badan [buundada xiran darteed].”

- Milkiile Maqaayad Galbeedka Seattle

» Maxeynu ka qabanaynaa

- Maqaayadaha iyo ganacsiyadu waxa hadda loo oggolaaday maritaan shuruud leh ay ku maraan Buundada Hoose ee Galbeedka Seattle.

[Xubnaha bulshada iyo ganacsatada waxey riixi karaan halkan si aad u dalbato maritaanka buundada.](#)



I FIIRI

3. Bulshadu waxey taageerayaan kordhinta lagu marayo (“buundada hoose”) ee Buundada Spokane St. Swing Bridge, gaar ahaan baabuurta shaqaalaha gurmada deg-degga iyo bukaanada

Ka soo jawaabayaasha ka socda dhammaan deegaanka waxey dano ka muujiyey fidinta maritaanka buundada hoose si gacan looga geysto hagaajinta waqtiga socodka looga gudbayo Wabiga Duwamish iyo si loo yareeyo ciriiriga baabuurta ee meelaha ku leexata.

- In badan waxey muujiyeen madax xanuun ku saabsan maritaanka buundada hoose, waxeyna soo jeediyeen wax ka qabad ku jeeda calaamadaha iyo war is dhaafsiga.
- Waxa ugu badan ee taageero loo muujiyey waa caafimaadka iyo socdaallada emerjenisga (ha ahaato mid caafimaad, qoys, ama xaalado dhaqaale oo degdeg ah) iyo maris ay helaan shaqaalaha caafimaadka.
- Dhowr qof waxey soo jeediyeen in wax ka qabad deg-deg ah lagu sameeyo howlaha tikidhada dadka la siiyo marka ay jirto xaalad caafimaad deg-deg ah.

“Adkeynta Buundada Hoose waxey abuurta ciriiri sare oo baabuurta, socodkii oo xadidma, waqti dheer oo ku baxa socodka baabuurta, iyo ganaaxyo iyo digniino aan loo baahneyn.”

- Ka Qeyb-galayaasha Kooda Diiradda ee Sikko Mando Relief Association

» Maxeynu ka qabanaynaa

- Waxan u fidinnay maritaannada ku meel gaarka ee buundada hoose shaqaalaha caafimaadka iyo bukaanada, maqaayadaha, iyo ganacsiyada. Dadku waa iney ahaadaan kuwo u qalma, soo codsada, keena leysinka taargada, iyo waa iney SDOT u oggolaataa ka hor inta aaney isticmaalin buundada hoose. Ma jiro qarash ku baxaya codsiga maritaanka.

4. Dadka deggan waxey codsanayaan daah-furnaani iyo wada hadal teknoolojiyad hoose

Bulsho badan iyo ganacsiyo ka qeyb qaatay waxey doonayaan wada-hadalka ku saabsan Barnaamijka Buundada Galbeedka Seattle oo la kordhiyo iyo dadaallada dib loogu xirmayo Galbeedka Seattle.

Caqabadaha Teknoolojiyada: Xubnaha bulshada ee heysan maritaanka ama aqoon u laheyn kombiyuutarada waxey codsanayaan wax badan oo teknoolojiyad hoose iyo waraaqo daabacan si ay wax ula socdaan. Waxey soo jeedinayaan:

- Falaayaro leh muuqaallo wararkii ugu dambeeyey iyo fursado ay ra'yigooda ku dhiibtaan, oo lagu soo dhejiyo ama loo qeybiyo dhamaan bulshooyinka Galbeedka Seattle.
- Warbixinno boosto toos dadka deggan lagu siiyo.

Caqabadaha dhinaca luqadda ah: Dadka deggan ee aan ku hadlin af Ingiriiska iyo luqad ahaann go'doonka ah waxey sheegayaan waraaqaha qoraalladu ku badan yihiin way adag tahay in la fahmo; waxey sidoo kale ka walwalaan waxa ay ka sameyn karaan emergensi bulshada dhammaan (musiibo dabiici) oo ka dhalata aqoon la'aanta ku saabsan ilaha luqado ama hagitaanka. Si tani loo xalliyo, waxey soo jeedinayaan:

- Wararka oo loogu gudbiyo telefoon iyo tekisti dhinaca isku xirayaasha bulshada si luqad ahaan ama bulsho ahaan dadka degaanka.
- Isticmaalka masawirro iyo muuqaallo wararka la isku dhaafsado si loo helo faham luqadaha oo dhan ah.

Darbiyo daah-furnaanta: Dad dhowr ah oo ka soo jawaabay waxey muujiyeen dareenkooda lagu weydiistay iney ka jawaabaan, laakinse taasi waxey aheyd mid aan caddeyn sida ama haddii fakarkooda saameyn ku yeelan karo go'aamada. Si tani loo xalliyo, waxey soo jeedinayaan:

- Warbixinno joogto lagu bixiyo warbaahin luqad (idaacad iyo internet).
- In la sii wado ku lug lahaanshaha bulshada kulamada (qof ahaan, muuqaal, gaaban), wareysiyo qof-qof, iyo kooxaha diiradda.

“Dhibka halkan jira waa caqabad luqad iyo caqabad waxbarasho. Waxa jira dad badan oon aqoon sida loo isticmaalo webseydyada. Sidee dadkaasi loogu diyaar gareyn karaa?”

- Qof deggan High Point

“Waxan dareemayaa in la igu iloobay Galbeedka Seattle. Waxey la dareen tahay in dadku inoo sheegayaan sida ‘wax loo ogaan karo’ waxeyna nooga tageen qalabyadeena noo gaarka ah.”

- Qof Delridge Deggan

➤ Maxeynu ka qabanaynaa

- Waxa la bilaabay farriimaha codka luqadaha kala duwan ee SDOT.
- Hagaajin guud oo ka warqabka mashruuca ah Xaalka iyo dhaqdhaqaaqyo iyadoo la bixinayo sharraxaado badan oo ku saabsan waxa la qabay iyo maxaa loo qabtay.
- In la sii wado marti-gelinta kulamada muuqaaleed ee aqallada furan oo tarjubaanno leh.
- In la sameeyo sawirro badan iyo muuqaallo si loogu wargeliyo isbeddellada socda.
- Kordhinta kula xiriirka daabcaad (falaayarro, boostarro, iimeello toos ah).



[Xubnaha bulshada waxey halkan ka arki karaan ama gujin karaan Digniinnada nidaamka Seattle.](#)

5. Hagaajinta dhaq-dhaqaaqa iyo cabiraado amniga waxey caawini karaan dib ugu xiranka Galbeedka Seattle bulsho weynta Seattle

Guud ahaan, ka qeyb galayaasha waxey dareemeen in baahida deg-degta ugu badan loo qabo ay tahay in la yareeyo ciriiriga gawaarida ee mara hareeraha waddooyinka lagu leexdo, oo ay qiyaasayaan iney sii noqonayaan kuwo sii ciriiri noqda iyadoo xakameynta COVID-19 qaadayo iyo shaqooyinka qof ahaan iyo iskuulku dib u bilaabanayaa.

- Dadka xaafadda waxey daneynayaan iney socdaalladda yareeyaan, laakinse ay uga safraan Galbeedka Seattle shaqo, alaabo ama dukaameysi dhaqameed oo jaban, ballamo caafimaad, caawin xubin qoyska ah, bangi aadis, folunteernimo, daryeel cunug, cibaadeysi diimeed, iyo booqasho saaxiibbo iyo reerka ah.
- Dad badan oo deggan ee qaata baska ama gaari dadka la wadaagi jiray cudurka baahsan ka hor hadda waxey isu rogayaan kuwo gaari gooni u wata, dhowr ka mida ahna waxey sheegeen iney gaari la raaci doonin dad aaney aqoon xilligan cudurka baahsan.
- Aqoonta rasmiga ee gawaari la wadaago way xadidan tahay, si kastaba dhowr ka qeyb-galayaal waxey sheegeen iney daneynayaan iney gawaari la raacaan dariska ama saaxiibada shaqada haddii ay ku helayaan dhiiri-gelin sida iney dhaqsi halka ay doonaan ku tagayaan, lacago ugu baaqaneyso, iyo iney marayaan buundada hoose.

- Kuwo badan waxey inta badan ku dhex socdaan Galbeedka Seattle, si kasta waxey sheegeen baabuurta oo badan darteed, wadis taxaddar la'aan, iyo dhismayaasha iney dareen amni ku hayaan dadka lugeynaya.
- In badan oo ka soo jawaabay waxey tilmaameen caqabadaha ka jira isticmaalka baaskiil ama mootooyin, oo ay ku jirto waddooyinka dhismayaasha ku socdaan, qatar dhaawac, qiimaha, waqti, iyo dhibaatooyinka ku yimaada howlo maalmeedka. Gaar ahaan qoysaska, hababkaasi ma aha kuwo lagu tiirsanaan karo.
- Qaar waxey nala wadaageen in qalabyada lagu helo qorshaha socdaallada iyo webseydka inaan la fahmi karin iyo ay dhib badan tahay isticmaalkooda, gaar ahaan socdaallada wata habab kala duwan.

“Waxan qaadan jiray baska, laakinse COVID dartiis waan joojiyey. Sababta COVID, gaari ayan u wataa kagana soo noqdaa shaqada. Laakinse ma doonayo inaan ku bixiyo labo saacadood iyo bar aaditaanka iyo ka soo noqoshada shaqo”

- Qof Deggan High Point

“Kuma qaadi karno dhamaan alaabaha bas iyo mooto iyo baaskiil. Waxanu u baahan nahay baabuurteena barakicin nalaku sameeyey darteed. Waxan ku kala nool nahay meelo kala fog. Ma jiro si kale oo meelaha lagu tagi karo inaad guryo inoo hagaajisaan mooyee.”

-Xubin Dadka Asalka ah iyo Shaqaale Lagama Maarmaan ah

Warar joogto ah oo ku saabsan Barnaamijka Buundada Galbeedka Seattle, isku qor helitaanka warsidaha. Ma qabtaa su'aal ama dareen aad dooneyso inaad nala wadaagto? La xiriir (206) 400-7511 ama WestSeattleBridge@seattle.gov



➤ Maxeynu ka qabanaynaa

- Waxanu ka hirgelinnay hagaajin in ka badan 200 mashruuc ku meelaha ku teedsan waddooyinka lagu leexdo, oo ay ku jirto meelo ammaan oo dadka lugeynaya ka gudbi karaan.

Muuqaalka Bogga Hore Sharraxaad iyo Xusid

Muuqaalka Sare: Baska RapidRide jooga Galbeedka Seattle; Hey'adda Vida

Hoose Bidix: Jid la maro oo Galbeedka Seattle leh habab kala duwan oo gaadiid; Masawir SDOT

Hoose Midig: Xubnaha bulshada Georgetwon oo ka wada hadlaya kaabaha dhismo; Masawir SDOT